

Sidee ayay Connect Care u beddelaysa daryeelka? (How does Connect Care change my care?)

Waxaad filan kartaa isla daryeelka tayada sare ee aad hesho, laakiin waxaad ogaan kartaa farqiyo kooban, sida inaad aragto dhakhaatiirta oo isticmaalaysa kumbuyuutaro dheeri ah iyo aaladaha gacanta lagu qabsado. Waxaan u adeegsanaa inaan la socono daryeelkaaga.

Connect Care ayaa diirada saari doonta adiga ayadoo:

- Ku siinaysa adeegyada casriga ah ee caafimaadka oo aad ka helayso aalada oonlaynka ah ee MyAHS Connect
- Kuu sahlaya inaad dhexgasho kooxdaada daryeelka aadna maamusho macluumaadka ku jirta diiwaankaaga
- Kor u qaadaysa xiriirada aad la samayso dhakhaatiirtaada
- Siinaysa kooxaha daryeelka sawirka dhameystiran ee caafimaadkaaga
- Siinaysa kooxda caafimaadka oo dhan macluumaadka ugu fiican ee la heli karo dhammaan higsigaaga daryeelka

Si aad xog dheeri ah u hesho, booqo
ahs.ca/connectcare



MyAHS Connect waxay gacanta kaa saaraysaa macluumaadka caafimaadka (MyAHS Connect puts your health information into your hands)

Haddii aad daryeelka ka helayso goob ama barnaamij adeegsada Connect Care aadna jirto ugu yaraan 14 sano aadna leedahay aqoonsi sugan, waxaad awood u leedahay inaad codsato inaad gasho MyAHS Connect.

Si aad u furato ciwaanka MyAHS Connect:

1. U sheeg kooxdaada daryeelka inaad dooneyso inaad gasho ciwaankaaga MyAHS Connect.
2. Ciwaan ka samayso Alberta.ca adoo booqanaaya myhealth.alberta.ca/myhealthrecords
3. Gal MyHealth Records adoo booqanaaya myhealth.alberta.ca/myhealthrecords kadibna geli ciwaanka iyo baasweerka aad samaysatay.

MyAHS Connect ayaa kuu ogolaanaysa inaad:

- Gasho macluumaadka aadna ku darto faalooyin ama wax ka badesho shaxdaada Connect Care.
- Inaad si amaan ah ula hadasho kooxda daryeelka Connect Care lana wadaagto macluumaadka.
- Aad codsato balamaha, aadna aragto balamihii hore iyo kuwa soo socda.
- Inaad balamo muuqaal ah la gasho kooxda daryeelka haddii ay joogaan xaruntaada.

MyAHS Connect waxaa taageerta MyChart® oo ruqsad ka haysata Epic Systems Corporation, © 1999-2023

Fadlan ogoow, agabka iyo macluumaadka lagu soo bandhigay MyAHS Connect ayaa keliya lagu heli karaa af Ingiriis.



Ka dhigista macluumaadka caafimaadka mid caafimaad badan
(Making health information healthier)
Connect Care

Si aad xog dheeri ah u hesho, booqo ahs.ca/connectcare





Sawirka dhameystiran ee caafimaadkaaga (A more complete picture of your health)

Connect Care waxay badelaysaa qaabka Alberta Health Services, iskaashatadeeda iyo dhinacyada kale u bixiyaan daryeelka caafimaadka gudaha Alberta.

Waxay ku kaydin doontaa dhammaan macluumaadka caafimaadka hal meel waxayna tagaysaa meesha aad aado higsigaaga daryeelka. Waxaad gelin doontaa waqti yar la wadaagista “taariikhdaada” dhakhaatiirta kaladuwan, maadaama ay horey u diyaarsanayd.

Haddii aad daryeel ka helayso xarunta Connect Care, waydii kooxdaada daryeelka inay galaan aalada cusub ee oonlaynka ah ee bukaanka oo la yiraahdo MyAHS Connect. MyAHS Connect ayaa kaa caawin doonta inaad xubin firfircoon ka noqoto kooxdaada daryeelka, adoo u ogolaanaaya inay aragto macluumaadkaaga caafimaadka ee qusaysa adeegyada ay bixisay AHS, kuna siinaysa awooda aad ku codsan karto inaad aragto macluumaadkaaga cunugaaga iyo xubnaha kale ee qoyska ee caafimaadka adoo isticmaalaya ciwaankaaga.

Oo laga heli karo Alberta Health Services iyo iskaashatada (Available across Alberta Health Services and partners)

Connect Care ayaa lagu sameeya wajiyo kaladuwan dhammaan Alberta muddo dhawr sano ah. Waxaa laga heli doonaa:

- Xarumaha Alberta Health Services, ayna ku jiraan isbitaallada iyo xarumaha caafimaadka
- Carewest
- CapitalCare
- Covenant Health
- Lamont Health Care Centre
- Alberta Precision Laboratories (APL)
- DynaLIFE Medical Labs
- Xarumo kale oo badan oo caafimaad iyo rugo

Waxay u taagan tahay ilaalinta sirta (Committed to your privacy)

AHS ayaa u taagan ilaalinta sirtaada iyo sugista macluumaadkaaga caafimaadka - waa waxa saxda ah ee la sameeyo, waana sharciga.

Qof kasta oo adeegsanaaya Connect Care ayaa u tababaran inuu ku ilaaliyo. Tan waxaa ku jira inaan ilaalino sirtaada anagoo yareynayna gelitaanka macluumaadkaaga caafimaadka keliya bixiyaasha u baahan inay arkaan si ay kuu daryeelaan. Connect Care ayaa leh qalabka si ay ula socoto una kormeerto cida galaysa macluumaadkaaga si ay u xaqiijiso xeerarka la raacaayo.

Connect Care ayaa sidoo kale yareyn doonta tirada nidaamyada kumbuyuutarada aan adeegsano, marka waxaan diirada saaraynaa dedaallada amaanka oonlaynka.

Amaanka xogtu waa muhiim. Dhammaan xogta bukaanka ayaa ku kaydsan seerfarada ay leedahay AHS oo yaala halkaan Alberta.

